



1. 15 daqiiqo kahor balantaada daawaynta taleefanka, guji linkiga laguugu soo diray iimeelka ama farriinta qoraalka ah.


- Linkiga ha la wadaagin cid kale. Keliya 1 qof ayaa isticmaali kara linkiga.
- Haddii cid kale u baahato inay ku soo biirto booqashada, u sheeg adeegbixiyaha marka booqashadu bilaabanto.




2. KidCare Anywhere wuxu ku furmi doonaa barawsarka internetka ee kombiyuutarkaaga.

- Kombiyuutarad Mac waxa lagu talinayaa internet barawsarka Google Chrome ama Safari


3. Guji Continue (Sii Wad).



4. KidCare Anywhere wuxu tijaabin doonaa khadkaaga internetka, maykarafoonka, iyo kamarada ka hor inta aanad ku soo biirin booqashada.
 - Guji Allow (u Oggoloo) KidCare Anywhere inuu isticmaalo maykarafoonkaaga iyo kamaradaada.
 - Haddii kamarada shaqeynayso, waxaad iska dhex arkaysaa murayaadda inta tijaabadu socoto.
 - Istickmaal muujinta soo furanta si aad u badasho kamaradaada ama maykarafoonkaaga hadii loo baahdo.
 - Guji Proceed (Siiwad) marka tijaabada la dhammeeyo.



5. Waxa aad geli doontaa qaybta sugitaanka ee onlaynka ah. Bixiyuhu wuxu ku soo biiri doonaa booqashada markay akhriyaan macluumaadkaaga.
 - Ha ka bixin ama ha soo laabin shaashadda KidCare Anywhere illaa iyo inta booqashadu dhammaanayso.




Tilmaamaha Soo Hadalka


• Kamarada iyo Maykarafoonka

- Xaqiiji in camer (kamaradaad) iyo microphone (maykarafoonkaagu) shidan yihiin. Guji badhanka si aad u shido oo aad u bakhtiiso.

• ON (DAAR)



• OFF (DAMI)



- Guji badhanka Setting (Setingiska) si aad u badasho kamaradaada ama maykarafoonka.



• Wada-sheekaysi

- Waxa aad u diri kartaa fariin sheekeysiga bixiyahaaga wakhtiga booqashada.
- Guji badhanka Chat (Wada-sheekaysiga) si aad u furato wada sheekeysiga. Qor fariintaada oo guji Send (Dir).



•Dhammeystiraya Booqashada


- Guji badhanka End Call (Dhammee Wicitaanka) Si aad usoo dhamayso.



- Haddii aad u baahato inaad dib ugu soo biirto booqashada ka dib marka aad dhammeyso wicitaanka, guji linkiga ku jira iimaylkaaga ama farriinta lagu soo dirqay oo isku day markale. Tani waxay kaliya shaqaysaa 5 daqiiqo gudaheed marka ay booqashadu dhamaato.

Cilad saarida


- Waxa i haysata mushkilad kamarada ama maykarafoonka ah.
- Hubi in barawsarkaaga internetka idan u haysto inuu marin u helo maykarafoonkaaga iyo kamarada.
- **Setingiska oggolaanshaha Google Chrome:**
 1. Marka aad ku jirto bogga KidCare Anywhere, guji badhanka permissions (oggolaanshaha) ama camera (kamarada) ee ku yaalla dhinaca bidix ee qaybta raadinta.




2. Hubi in iswiiyada kamarada, maykarafoonka, iyo codku daaran yihiin.

- **Setingiska oggolaanshaha Safari:**


1. Marka aad ku jirto bogga KidCare Anywhere, guji badhanka permissions (oggolaanshaha) ku yaalla dhinaca bidix ee qaybta raadinta. Dabadeed guji Setingisyada Websaydka.



2. Hubi in oggolaanshaha la geliyay Ask (Waydii) ama Ama Allow (Oggoloo). Dooro xulashada beddelaadda.



- **Ma heli karo linkiga booqshadeyda.**
 - Linkiga waxaa loo diray iimeelkaaga iyo taleefankaaga 3 jeer kahor wakhtiga booqashadaada.
 - Xilliga ballan qabsashada
 - 24 saacadood ka hor
 - 15 daqiiqo ka hor
- Linkiga hala wadaagin cid kale. Keliya 1 qof ayaa isticmaali kara linkiga. Haddii cid kale u baahato inay ku soo biirto booqashada, u sheeg adeegbixiyaha marka booqashadu bilaabanto.
- Ka raadi "Visitnow" fariintaada ama iimeelkaaga.
 - Waxaad ka eegtaa fooldharada Qashinka ama Farriimaha aan la Rabin



Wixii taageero farsamo ah, la hadal (816) 302-7895

Si aad balan kale u qabsato, la hadal (816) 234-3700